

## Taageero sharci iyo talo

**Fiiro gaar ah:** Tani waa macluumaad guud. Waxaa loogu talagalay fahamkaaga oo keliya mana aha talo sharci.  
Si aad u hesho talo sharci oo gaar ah la hadal xirfadle sharci oo u qalma.

Haddii qof uu la kulmayo faragelin shisheeye helitaanka taageero iyo talo sharci waxay ka caawin kartaa inuu fahmo xuquuqdiisa iyo ikhtiyaarrada uu heli karo.

## Xuquuqdaada gudaha New Zealand

[Halkan ka ogow wax badan oo ku saabsan xuquuqdaada New Zealand gudaheeda](#)

## Meelaha laga helo taageero sharci

### Sharciga Bulshada

Xarumaha Sharciga Bulshada waxay ka caawin karaan:

- macluumaad iyo wacyigelin sharciyeed
- talo sharci, caawimo, iyo matalaad sharci gaar ahaan dadka aan awoodin inay bixiyaan kharashka adeegyada sharciyeed

Waxaa jira 24 Xarumood oo Sharciga Bulshada ah oo ku yaalla guud ahaan New Zealand. Xarumaha intooda badan waxay bixiyaan adeegyo gaarsiineed ama rugo adeeg oo ku yaalla bulshooyinka yaryar. Si toos ah ula xiriir xarumaha deegaanka si aad ballan u qabsato.

[Booqo mareegta Community Law si aad u hesho macluumaad dheeraad ah](#)

### Youth Law

Youth Law waxay bixisaa adeegyo sharci oo bilaash ah dhammaan carruurta iyo dhalinyarada ka yar 25 jir.

[Booqo mareegta Youth Law si aad u hesho macluumaad dheeraad ah](#)

### Xafiiska Talo-bixinta Muwaadiniinta

Xafiiska Talo-bixinta Muwaadiniinta wuxuu ka caawin karaa:

- macluumaad ku saabsan xuquuqaha
- macluumaad iyo talo bilaash ah oo qarsoodi ah kana madax-bannaan cid kale
- u gudbinta Xarunta Sharciga Bulshada ee deegaankaaga si aad u hesho talo

sharciyeed

- macluumaad ku saabsan sida loo helo adeegyada aad u baahan karto

[Booqo mareegta Citizens Advice Bureau si aad u hesho macluumaad](#) ama si qarsoodi ah caawimo ugu hesho wac lambarka bilaashka ah ee 0800 367 222.

## **Legal aid**

Kaalmada sharci waa maalgelin dowladeed oo loogu talagalay dadka aan awoodin inay bixiyaan kharashka qareen. Waxay ka caawisaa bixinta kharashka caawimada sharciyeed iyo xallinta dhibaatooyinka sharci ee laga yaabo inay maxkamad gaaraan si dadka aan looga hor istaagin caddaaladda sababtoo ah ma awoodaan inay qareen qabsadaan.

[Halkan ka ogow wax badan oo ku saabsan kaalmada sharci](#)

## **New Zealand Law Society**

New Zealand Law Society (NZLS) waa hay'adda nidaamisa qareennada New Zealand. Dadku waxay ka raadsan karaan qareen diiwaankooda onlaynka ah. Waxay ku qoran yihiin qareennada loo oggolaaday inay sharciga ku shaqeeyaan New Zealand.

[Booqo mareegta New Zealand Law Society](#)